



**DAWLADDA HOOSE EE DEGMADA GAROOWE
DAWLADDA PUNTLAND EE SOOMAALIYEED**

**WARGELINTA DADWEYNAHA
EE
QORSHAHA MAAREYNTA DEEGAANKA IYO BULSHADA**

Juun 6, 2021

Dawladda Hoose ee Degmada Garoowe waxay fulinaysaa Wejiga Labaad ee Mashruuca uu maalgelinayo Bangiga Adduunku ee Adkasiga¹ Magaallooyinka Soomaaliyeed. Dawladda Hoose ee Degmada Garoowe waxay qorsheysay in ay dhisto shan (5) waddo oo laami ah iyo hal (1) buundo. Waddooyinka la dhiso doono cabbirkoodu wuxuu dhan yahay 7.6km waxayna kala yihiin:

1. Waddada Waaberi (aargada Saddex Xiddigood ilaa Kaam Shabeelle);
2. Waddada Injida (waxay isku xiraysaa Waddooyinka Islaan Maxamed iyo Shiikh Cabdulqaadir);
3. Waddada 30-ka (dhanka Koonfureed);
4. Waddada Towfiiq (wadada hormarta Isbageeti);
5. Waddada hormarta Dugsiga Sare ee Gambool, Jaamacadda Dawladda Puntland (*Puntland State University*) iyo Cisbitaalka Garoowe; iyo
6. Buundo loo maro Cisbitaalka iyo Goobaha kale ee Waxbarashada.

Dawladda Hoose waxay diyaarisay Qorshaha Maareynta Deegaanka iyo Bulshada (QMDB) iyada oo tixraacaysa shuruucda Dawladda Puntland iyo Halbeegyada Bangiga Adduunka ee ku aadan Deegaanka, Bulshada, Caafimaadka iyo Badqabka. Sideed (8) ka mid ah tobanka (10) Halbeeg ee Deegaanka iyo Bulshada ee uu meel mariyey Bangiga Adduunku ayaa mashruucan lagu dabakhay.

QMDB waxa uu qeexaya saameynta mashruucu ku keeni karo deegaanka iyo bulshada ku nool magaalada, isla mar ahaantaasna tilmaamaya hawlaha u baahan in wax laga qabto si loo maareeyo saameynta si waafaqsan shuruudaha Bangiga Adduunka. Qorshahan waxaa kaabaya qorshayaasha kale ee lagu maareynayo deegaanka iyo bulshada ee mashruuca kuwaas oo ay ka mid yihiin:

1. Qaab-dhismeedka Maareynta Deegaanka iyo Bulshada;
2. Habraaca Maareynta Shaqaalaha;
3. Qorshaha Hawlgelinta Daneeyayaasha;
4. Qorshe Hawleedka Dib udejinta; iyo
5. Qorshaha Maareynta Amniga.

¹ Sidii ay ugu adkaysan lahaayeen colaadaha iyo masiibooyinka dabiiciga ah.

Diyaarinta QMDB waxaa lagu saleeyey latashiyo iyo xogo laga helay daneeyayaasha mashruuca iyo qiimeyn lagu sameeyey xaaladda dhaqan-dhaqaalle ee bulshada ku nool aagga la hirgelin doono waddooyinka. Qiimeyntii la sameeyay waxaa ka soo baxday in mashruucu saameyn dhexdhexaad ah oo taban iyo khataro uu ku yeelanayo deegaanka iyo bulshada ku nool agagaarka waddooyiinka laga dhisay.

QMDB waxaa si faah-faahsan looga dheehan karaa saameynta togan iyo mida taban ee mahruucu uu leeyahay deegaanka iyo bulshada. Sidoo kale waxa uu tilmaamayaa hawlaha la rabo in wax laga qabto si looga hortago, loo yareeyo ama meesha laga saaro saameynta taban ama khataraha ka dhalan kara heerarka iyo hawlaha la xiriira hirgelinta waddooyinka.

Saameyn Taban ee heerarka kala duwan ee dhismaha waddooyinka	Saameyn Togan ee la helayo dhisida waddooyinka cusub
<ul style="list-style-type: none"> • Burburinta hantida dadka mashruucu saameynta ku yeeshay ee ku nool goobaha waddadu cirirka ka tahay (ka yar cabbirkii loo baahnaa); • Dikhaw ku dhaca hawada, biyaha, IWM; • Sawaxan ka dhasha gaadiidka ama qalabka la isticmaalayo; • Khataro caafimaad ee ka dhalan kara waqtiga dhismaha waddooyinka sida shilalka; • Noocyada kala duwan ee wasakhda; • Kor u kac ku yimaada qulqulka biyaha xiliyada roobku da'o; • Bulshadu ama shaqaaluhu in ay u nuglanaadaan khataraha waqtiga shaqada dhismaha waddooyinku socdaan; • Faafitaanka cudurka COVID-19; • Shaqaaqooyinka ka dhanka ah jinsiga • Shaqaaleysiinta carruurta; iyo • Isku socodka gaadiidka iyo dadka inta dhismaha waddooyinku socdaa. 	<ul style="list-style-type: none"> • Fursado shaqo abuur, gaar ahaan dadka xirfada leh sida injineerada, sahamiyayaasha dhulka, muruq-maalka, IWM; • Kor u kac dakhliga shaqaalaha ka faa'iideysanaya mashruuca; • Kor u kaca dhaqaalaha gudaha sida abuurida fursadaha ganacsiga; • Fududeynta in qaybaha kala duwan ee bulshadu si sahlan ku gaaraan goobaha adeeg bixinta; • Kor u qaadidda isku socodka gaadiidka iyo dadka dhismaha waddooyinka ka dib; iyo • Hormarinta bilicda guud ee magaalada iyo agagga waddooyinka laga hirgeliyey.

QMDB waxaa fulin doonta Shirkadda dhisaysa waddooyinka kor ku xusan (Qandaraasle), waxaa duljoogteyn doonta Dawladda Hoose ee Degmada Garoowe iyo Hay'ada Qaramada Midoobay ee Adeegyada Mashaariicda ee loo yaqaan *United Nations Office for Project Services (UNOPS)*.

Fiiro gaar ah: Buundada iyo waddada hormarta Dugiga Sare ee Gambool iyo Jaamacadda Dawladda Puntland dhismahoodu wuu ka dambeyn doonaa waddooyinka kor ku xusan, waxayna yeelan doonaan qorshayaal gooni u ah.

Mahadsaniidiiin,

Wada Shaqeyn Wacan,